

# Talooyinka u isticmaalida si badqabta Wi-Fi-ga dadweynaha

Shakhsiyaadka xunxun waxay ka faa'adaysan karaan onlaaynkaaga. Hoos ka akhri waxoogaa talooyina si aad u tixgalisid hadii aad u baahan tahay inaad isticmashid Wi-Fi dadweyne.

Iyadoo laga jawaabayo dilaaca Karoonfayras iyo xidhitaanka ganacsiyada iyo maktabadaha, in badan oo inaga mid ahi waxay wakhti badan ku bixinayaan onlaayn. Natiijadaasi darteed, waxaynu u baahan karnaa inaan isticmaalno Wi-Fi dadweyne si aan intarnadka u galno. Haddii aad ogaatid inaad u baahan tahay inaad isticmaashid Wi-Fi dadweyne, fadlan tixgali talooyinkan soo socda ee ka yimid Sargaalka Ilaalinta Xogta gobolka si laagaga caawiyo badbaadinta xogtaada:

## 1. Xaqiiji inaad haysatid shabakada saxda ah.

Hubi inaad ku xidhan tahay shabakada saxda ah. Shakhsiyaadka xunxun waxay abuuri karaan shabakado u muuqda bilaa waxyeelo iyadoo ay ku saleysan tahay magacooda lakiin xaqiiqatan kugu xidhaya shabakad si ay u arkaan sidaad u isticmaalaysid khadka. Tani macneheedu waa hadii aad galisid xogtaada gaarka ah ama furayaasha wabsaaydyada, tuugta intarnadku waxay awoodi doonaan in ay xadaan macluumaadkaaga. Si tan lagaaga badbaadiyo, u akhri magaca shabakada si taxadir leh oo hadii ay suurto gal tahay, weydii shaqaale ama hubi caalamada ganacsiga si aad u hubisid in shabakadu sax tahay.

Shabakadaha caanka ah, sida kuwa silsiladaha kofeega caanka ah, waxay aad u yar in laga shakiyo maxaa yeelay shirkadu waxay u shaqeynaysaa adeeg ganacsi ahaan. Shabakadaha caanka ah badanaa way ka amaan badan yihiin shabakadaha Wi-Fi degdeg ah ee kasoo muuqda tilifoonkaaga markaad joogtid goob dadweyne.

## 2. Iska xidh ku xidhiidhinta atomaatiga ah.

Aalado badan (tilifoonada casriga ah, laabtoobyada, iyo tilifoonada waaweyn) waxay leeyihiin isku xiriirin toosa. Tani waxay u ogolaanaysaa aaladaada in ay si haboon iskugu xirto shabakadaha ka agdhow. Tani way ku haboon tahay shabakadaha amaanka ah, lakiin waxay

sidoo kale aaladaada ku xidhi kartaa shabakadaha aan amaanka ahayn. Tani waad joojin kartaa adoo maraya akhtiyaarka aaladaada. Iska xir akhtiyaarkan, gaar ahaan marka aad u safraysid goobaha aanad horey u tagin. Taxadir dheeraad ahaan, waxaad hubin kartaa "Ilow shabakada" ka dib markaad isticmaashid Wi-Fi dadweyne.

Waxaad sidoo kale la socon kartaa Bluetooth markaad joogtid goobaha dadweynaha. Bluetooth xiriirintiisu waxay ogolaanaysaa wada xiriirka aalado kala duwan, tuugtuna waxay eegan karaan signalada Bluetooth furan si ay u galaan aaladaada. Ka xir akhtiyaarkan tilifoonkaaga iyo aaladahaaga kaleba markaad joogtid goob kugu cusub.

### 3. Xir wadaagista faaylalka.

Hubi inaad xirtid khiyaarka wadaagista faaylka intaad joogtid Wi-Fi dadweyne. Waxaad ka xiri kartaa wadaagista faaylka doorbista nidaamka ama kaantarool banalka, iyadoo ay ku xiran tahay aaladaada maskaxdeeda. AirDrop waa tusaale akhtiyaarka wadaagista faaylaha ay tahay inaad iska xirtid. Maskaxaha qaar sida Windows/Koomiyuutarka ayaa kuu xiri doonaa wadaagista faaylka iyadoo dooranaya akhtiyaarka "dadweyne" markay ku xirayaan shabakad dadweyne oo cusub marka koobaad.

Talaabooyinka xiritaanka faylka

#### **Koomiyuutarka:**

1. Booqo Xarunta Shabakada iyo Wadaagista (Network and Sharing Center).
2. Ka dib Badal akhtiyaarada wadaagista.
3. Xir wadaagista faaylka iyo daabicista.

#### **Macs-ka:**

1. Booqo Doorashada nidaamka.
2. Dooro Wadaagista.
3. Tigta kaa qaad midwalba.
4. Marka xiga, guji AirDrop, oo dooro ii ogolow inuu i ogaado: Qofna.

Kuwa iOS, kaliya ka raadi AirDrop Kaantarool Santarka oo xir.

### 4. Istimaal VPN.

Tixgali isticmaalida VPN (Shabakada Gaarka ah) ee aaladaada. VPN waa midka ugu fiican ee qarinta dhigitaalka ah ee Wi-Fi dadweynaha. Wuu galiyaa xogtaada koodhka marka ay

u gudbaysa iyo ka gudbayso aaladaada waxaanu u dhaqmaa sida "wado" badbaado si xogtaada aan loo arkin marka ay mareyso shabakada.

## 5. FBI waxay ka digaysaa wabsaaydyada xidhan– HTTPS.

[FBI waxay ka digtay](#) shabakadaha leh ciwaanka ku bilaabma "https." Helitaanka "https" iyo caalamada qufulku waxay tilmaamayaan in wabsaaydka la xiray oo booqdayaashu xogta u wadaagi karaan si badqabta. Si kastaba ahaatee, danbiilayaasha intarnadku waxay hada waxay hada isku halaynayaan aaminaada dadweynaha iyagoo ku khiyaamaya dadka wabsaadyo beena oo isku dara https oo la moodo amaan iyagoon se ahayn.

Talooyinka FBI:

- Kaliya ha aaminin magaca iimaylka: isweydii ujeedada waxa ku jira iimaylka.
- Hadii aad heshid iimayl shaki leh oo uu la socdo linkiga ka yimid cid aad garanayso, xaqiiji in fariintu sax tahay adoo wacaaya ama iimayl u diraa cida soo dirtay. Ha ugu jawaabin iimaylka shakiga leh si toosa.
- Hubi khaladaadka kalmadaha iyo dhoomayn khaldan haduu ku jiro linkiga (tusaale., hadii ciwaankaasi ay ahayd inuu ku dhamaanaado ".gov" uu ku dhamaado ".com" taas badelkeeda).
- Kaliya haku aaminin wabsaayd maxaa yeelay wuxuu leeyahay calaamada qufulka ama "https" ciwaankiisa.

## 6. Galinta macluumaadka xasaasiga ah laguma talinaayo.

Xataa hadii aad haysatid VPN wali lagulama talinaayo galinta akoonada gaarka ah ee bangiga, ama xogta khaaska ah ee xasaasiga ah ee la midka ah sida lambarka adeega bulshada ee shabakadaha aan aaminka ahayn. Xataa shabakadaha dadweynaha amaanka ah ayaa khatar noqon kara. Isticmaal xukunkaaga ugu macquulsan hadii ay tahay inaad galisid macluumaadkan Wi-Fi dadweyne. Dhaqdhaqaaqyada maaliyadeed, waxa fiican inaad isticmaashid hotspot ka tilifoonkaaga.

## 7. Amaan ah iyo aan amaan ahayn.

Waxa asaasiyan jira labo nooc oo shabakadaha Wi-Fi ah: Amaan iyo midaan amaan ahayn.

Markasta oo ay macquul tahay ku xirnow shabakadaha amaanka ah ee dadweynaha. Shabakadaha aan amaanka ahayn waxa loogu xiririn karaa iyadoonay lahayn wax fure amni ah sida furaha sirta ama galitaanka. shabakada amaan ah waxay badanaa u baahan tahay in

isticmaaluhu ogalaado shuruudaha iyo heshiiska, akoon diwaangashado, ama ku qoro furaha sirta ah ka hor intaanu ku xirin shabakada.

## **8. Ka shaqeysii firewall-kaaga.**

Hadii aad isticmaalaysid laabtoob, ogolow firewall-kaaga intaad isticmaalaysid Wi-Fi dadweyne. Firewall-ku wuxuu u dhaqmaa dayr ahaan kasoo ka ilaaliya aaladaada khataraha jabsashada. Istickmaalayaashu waxay iska xiri karaan firewall-ka Windows ka maxaa yeelay ogeysiisyada iyo xayeysiisyada awgeed wayna iska ilaawi karaan. Hadii aad rabtid inaad dib u shidid koomiyuutarkaaga, waa inaad tagtaa kantarool banalka, "Nidaamka iyo Amniga" oo dooro "Windows Firewall". Hadii aad tahay isticmaale Mac leh, booqo "Nidaamka iyo Doorashada", ka dibna "Amniga & Asturnaanta", ka dibna taabka "Firewall" si aad u furtid khiyaarka.

## **9. Istickmaal Antifayraska.**

Sidoo kale hubi inaad ku shubatid antifayraskii ugu danbeeyey laabtoobkaaga. Barnaamijyada antifayrasku waxay kaa caawin karaan in ay ku badbaadiyaan markaad isticmaalaysid Wi-Fi dadweyne iyagoo dareemaya tuugada gali karta aaladaada intaad isticmaalaysid shabakad la wadaagayo. Ogeysiye ayaa ka digi doona hadii faayrasyada la yaqaano lagusoo shubo aaladaada ama hadii ay jiraan dhaqdhaqaaqyo khatar ah, weerar, ama tuug galo aaladaada.

## **10. Istickmaal hubinta labo jibaaran ama ansixinta talaabooyinka badan.**

Istickmaal hubinta talaabooyinka badan (MFA) markaad galinaysid wabsaaydyada macluumaadkaaga gaarka ah. Tani macneheedu waa waxaad haystaa koodh xaqiijin labaada (oo lagusoo diray tilifoonkaaga ama uu ab ku siiyey ama caadi lagu siiyey fure ahaan) kasoo ku difaacaya. Sidaasi darteed xataa tuugta intarnadku hadii ay helaan magaca aad ku isticmaashid iyo furaha, ma gali karaan akoonkaaga iyagoon helin koodhka xaqiijinta.

## **11. Lasoco aaladahaaga gaarka ah.**

Hakaga tagin laabtoobkaaga, tilifoon weyn, ama tilifoon casriya adoon ogeyn meelaha dadweynaha ama baabuurta. Xataa hadii aad ka taxadiraysid shabakada Wi-Fi, taasi kama hor istaagi karto qof qaadashada hantidaada ama khaawisida macluumaadkaaga. Iska ilaali meelaha kugu wareegsan oo ka foojignow kuwa kugu hareeraysan.

## 12. Talooyinka kale ee badqabka onlaaynka ah.

Halkan waxa ah waxoogaa talooyin badqabka onlaaynka ah, gaar ahaan hadii aad isticmaalaysid intarnad Wi-Fi dadweyne:

- Isticmaal fure sira oo adag.
- Koodh u samee aaladaada.
- Iska ilaali iimaylada beenta ah.
- Ka taxadir waxaad soo galinaysid baraha bulshada. Macluumaad farobadan oo gaar ahi waxay ka saacidi karaan tuugta intarnadku inay ka fikirnaan furaha sirta.
- Masax macluumaadka hore ee aanad u baahneyn hada.
- Haddii shabakada ku weydiisato inaad ku xidhatid software-ka ama kusoo darto boga haku xiriirin.
- Hubi qeybihii ugu danbeeyey iyo in lagu cusbooneysiyeey software-ka aaladaada si aad iskaga ilaalisid arimaha la ogyahay.